



# County of San Diego

DEPARTMENT OF ENVIRONMENTAL HEALTH AND QUALITY



P.O. BOX 129261, SAN DIEGO, CA 92112-9261

Lambarka telefoonka: (858) 505-6900 | Fakiska: (858) 999-8920 | [www.sdcdehq.org](http://www.sdcdehq.org)

## IIBKA CUNTOOYINKA GURIGA LAGU SAMEEYO (MEHKO) WAXYAANAHA LOO BAAHANYAHY KAHOR BILOWGA GANACSIGAAGA

Si aad u noqoto mulkiilaha libka Cuntooyinka Guriga Lagu sameeyo (MEHKO) ee gudaha Degmada San Diego, dadka danaynaya waa inay oggolaansho ka helaan Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka. Waxyaabaha hoos ku qoran ayaa kaa caawiyaan inaad diyaariso oo aad soo gudbiso codsigaaga qiimaynta u qalmidda. Waxaa lagugu soo wargelin doonaa heerka codsigaga muddo labaatn (20) maalmood oo shaqo gudahooda ka dib markaan helno codsigaaga oo dhamaystiran.

### 3 TALAABO FUDUD OO LAGU BILAABO MEHKO-QORSHE, CODSI, HAWGELIN

 QORSHE	 CODSI
<input type="checkbox"/> Xaqiiji in liiskaaga cuntooyinka qorshaysan ee cuntada laga oggol yahay MEHKO.	<input type="checkbox"/> Soo gudbi foomka <a href="#">Nidaamka Heerka Hawlgelinta MEHKO</a> iyo liiska cunnada ee la soo jeediyay.
<input type="checkbox"/> Haddii aad kiraysato guriga, la hadal mulkiilaha gurigaaga si aad u ogaato haddii aad ku yeelan karto ganacsi guriga ah ayaa yeelan karto.	<input type="checkbox"/> Soo gudbi <a href="#">odsiga Ogolaanshaha Caafimaadka</a> bixi khidmada kharashka oggolaanshaha.
<input type="checkbox"/> Dhameey <a href="#">koorsada shahaadada Maareeyaha Badqabkaa</a> cunnada.	<input type="checkbox"/> Soo gudbi <a href="#">Shahaadada Maareeyaha Badqabka Cuntada oo sax ah</a> .
<input type="checkbox"/> La xidhiidh maamulka deegaankaaga si aad u ogaato <a href="#">shuruudaha ogolaanshaha deegaanka</a> ee ay tahay in la helo ka hor hawlgalka (sida ruqsada ganacsiga, ogolaanshaha degenaanshaha guriga).	<input type="checkbox"/> Soo gudbi <a href="#">natiijooyinka baaritaanka biyaha ceelka</a> – Tani waxaa loogu talagalay oo keliya MEHKOs kuwaas oo biyahooda laga keeno ceel gaar ah. Qiimaynta hore ee buuxa oo ay ku jiraan kiimikada aan dabiici ahayn iyo wadarta natiijooyinka baaritaanka coliform ayaa loo baahan yahay in lagu gudbiyo codsiga ogolaanshaha caafimaadka.
<input type="checkbox"/> La xidhiidh <a href="#">Waaxda Maamulka Canshuuraha iyo khidmadaha ee CA</a> si aad u ogaato wax ku saabsan canshuurta iibka.	
<input type="checkbox"/> Qorshaynta inaa iibiso ama u oggolaato khamriga gudaha MEHKO-kaaga?? La xidhiidh <a href="#">Waaxda Xakamaynta Cabitaannada ee CA</a> .	

### HAWGELINTA

<input type="checkbox"/> Hubi inaad raacdo Habraaca Heerka Hawlgelinta (SOP) ee aad gudbisay. Wax ka beddel kasta oo lagu sameeyo SOP-gaaga ka dib oggolaanshaha hore waxay u baahan doontaa dib-u-soo-gudbinta SOP-gaaga iyo kharashyo dib-u-eegis oo dheeraad ah ayaa lagu dabaqi doonaa.	<input type="checkbox"/> Ku sugnoow kaliya xadka cuntada maalinlaha ah iyo toddobaadlaha ah: <i>Ugu badnaan 30 cunto maalintii, oo aan ka badnayn 90 cunto toddobaadkii. Haddii aad ku shaqaynayso guuraaga wareega ee la oggol yahay oo qayb ka ah MEHKO, xaddidaadda cuntadu waxay kordhisaa ugu badnaan 80 cunto maalintii oo aan ka badnayn 200 oo cunto toddobaadkii.</i>
<input type="checkbox"/> Raac hab-dhaqannada habboon ee badqabka cuntada oo samee <a href="#">baaritaan joogto ah</a> .	<input type="checkbox"/> Si fiican u qub <a href="#">dufanka, saliida, iyo hafhaaga dufanka</a> .
<input type="checkbox"/> Lasoco dakhligaaga guud ee sanadlaha Xaddidaadaha dakhliga waxaa isbeddel lagu sameeya sanad walba sicir bararka iyadoo lagu salaynayo <a href="#">tusmada qiimaha macaamiisha ee CA</a> .	<input type="checkbox"/> Noqo deris wanaagsan! Ka digtoonow saameynta aad ku yeelan karto dariskaaga marka la eego dhanka baarkinka, qashinka, iyo buuqaha dhashay hawlgalkaaga.

**NALA SOO XIDHIIDH** Lambarka Khabiirka Shaqada ku jira (858) 505-6900, ama hab iimayl ahaan

[FHDMEHKO@SDCOUNTY.CA.GOV](mailto:FHDMEHKO@SDCOUNTY.CA.GOV)